بسم الله الرحمن الرحيم

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
GOLAHA WAKIILADA

KU: MADAXWEYNAHA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

March 28, 2017

Ujeeddo: Warqad Furan - MAHADCELIN

Mudane Madaxweyne,

Marka hore Salaan kal iyo laab ah adiga, xubnaha Xukuumadda iyo dhammaan inta uu qoraalkaygani cod ahaan, qoraal ahaan ama muuqaal ahaanba u soo gaadho.

Mudane, anigoo Wakiil ka ah kuna hadlaya codka inta ay midayso aragtida saldhigeedu yahay is xurmaynta, cadaaladda, xisaabtanka iyo abaal celintu waxaan qoraalkaygan kuugu soo qoray si aan u guto waajibaad **wadaninimo**, **dadnimo** iyo **islaamnimo** oo aan yaqiinsaday in laga leexleexday ama, kaba sii darane, la leexiyey.

Mudane waxaan saxaafadda dhowaan ku arkay koox sheegatay magaca beesha aan ka soo jeedo ee Maxamuud Garaad oo lagu dafirayo tallaabooyinkii waxqabadka ahaa ee aad sida hagar la'aanta ah ugu qabatay dadka iyo degaanada beeshaasi. Mudane Madaxweyne, waxaan garawsan waayey qayladan iyo qawadkan Hargeysa laga dhoofiyey ee canka loo geliyey odayaal Laascaanood lagu ururiyey. Waxaa murugo leh in iyadoo aynu xogogaal u nahay sida aan kala hadhka lahayn ee Madaxtooyada Somaliland isaga xil saartay la xaajoodka, dib u dhiska iyo xil-ku-taxidda ardaagayga in haddana raggii loo igmaday inay xukuumadda iyo beesha xidhiidhiyaan Laascaanood ka abaabulaan shirar dadweynaha lagu kala qaybinayo, xukuumaddana colaad loogu gelinayo.

Mudane Madaxweyne, waxaan hoos ku soo taxay intii aan ka haleeli karayey waxqabadka iyo Xilalka ay xukuumadaadu u hibeysey beeshayda oo aan u kala qaaday laba waaxood oo kala ah:

(1) Muddadii ka dambeysey Shirkii Awrboogays oo ka kooban magacaabista laba [**2**] degmo, **19** Xil dawladeed, derejo-siinta **35** sarkaal oo cusub oo uu ku jiro **hal Janaraal**, iyo fulinta **15** Mashruuc Horumarineed, iyo

(2) Muddadii ka horeysey shirkaasi balse aad adigu xilka qaranka haysey oo aad bixisay magacaabista **Hal** [1] **Gobo**l, **shan** [5] **degmo** oo cusub, **40 xil** dawladeed, iyo derejo-siinta **28 Sarkaal** oo ay ku jiraan **laba Janaraal**.

Waxaa ujeedada rasmiga ah ee qoraalkaygani daarran yahay inaan beeshayda ka xijaabo laba naanaysood oo xunxun oo na qabsan kara haddii aan hadalkaas xanafta lahaa ee kooxdaas laga jawaabin. Ta koowaad waa naanaysta loogu yeedho cidda ama ***qofka ka arradan aabaal gudista***, ta labaadna waa naanaysta loogu yeedho dadka ama ***qofka aanay jirin wax deeqaaba [ama uu ku qancaaba]***.

Mudane, adigoo liisaska hoose akhrisan doona, waxaan ku xusuusinayaa inaanay jirin degaanada kale ee beesha Dhulbahante wax kale oo sidaa u muuqda, haba yaraatee, oo laga qabtay. ***Anigoo xeerinaya cadaaladda, wax wada lahaanshaha iyo wada noolaanshaha, waxaan kuu soo jeedinayaa inaad iga oggolaato in xukuumaddu u soo jeesato horumarinta iyo saami-siinta degaanada kale ee Sool, Sanaag iyo Buuhoodle.***

B. Xilalka iyo derejooyinka xukuumaddu siisay beesha Maxamuud Garaad wixii ka dambeeyey Shirkii Awrboogays:

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha
2. Wasiir Ku xigeenka Wasaaradda Duulista Hawada
3. Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Cadaaladda
4. Abaanduulaha Ciidanka Qaranka
5. Derejosiinta 35 Sarkaal oo ahaa hore u ahaa Ciidan Beeleed
6. Guddiga Qiimaynta Derejosiinta Ciidamada, Xubin
7. Guddoomiye Ku Xigeenka Hay'adda Maamul Wanaagga
8. Ku Xigeenka Ambaasadoorka Kenya
9. Xoghayaha Guud ee Golaha Wasiirada
10. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dalxiiska

11. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda
12. Agaasimaha Guud Hayádda qandaraasyada Qaranka
13. Taliyaha Qaybta Booliska Gobolka Sool
14. Isuduwaha Wasaaradda Dalxiiska
15. Isuduwaha Wasaaradda Warfaafinta
16. Xoghayaha Maamulka ee Degmada Laascaanood
17. Agaasimaha Waaxda Shidaalka ee Wasaaradda Macdanta
18. Gudoomiye Ku Xigeenka Xisbiga Kulmiye
19. **Magacaabista Degmada Shaxda**
20. Gudoomiyaha Degmada Shaxda
21. Gud Ku Xigeenka degmada Shaxda
22. Xoghayaha Degmada Shaxada
23. **Magacaabista Degmada Adhicadeeye**
24. Hawlgelinta iyo shaqo siinta Ciidamo Boolis ah oo loo qoray degmooyinka Gobolka Xaysimo, Awrboogays iyo Xuddun.
25. Qalabaynta [oo ay ka mid yihiin gaadiid cusub] Ciidamada aagga Nugaal.
26. Ka hawlgelidda gurmadka abaaraha

T. Barnaamijyada Horumarineed ee degaanada Maxamuud Graad laga yagleelay muddadii ka dambaysey Shirkii Awrboogays waxaa ka mid ah:

1. Guriga Gobolka Xaysimo
2. Qaybta Booliska Gobolka Xaysimo
3. Saldhigga Booliska Taleex
4. Qalabaynta Dugsiga Sare ee Carrooley
5. Dhammaystirka Dugsiga Hoose/Dhexe ee Laasacurdin
6. Saldhigga Booliska Awrboogays
7. Guriga Maamulka Degmada Awrboogays
8. Saldhigga Booliska Fiqifuliye
9. Guriga Maamulka Degmada Fiqifuliye
10. Ceelka Biyaha Kacaya
11. Ceelka Biyaha Ardaa
12. Ceelka Lafaweyne
13. Ceelka Biyaha Jiidali

14. Ceelka Biyaha Adhicadeeye 1
15. Ceelka Biyaha Adhicadeeye 2

J. Muddadii ka horeysey Shirkii Awrboogays waxay Xukuumaddaadu [Adiga, Wasiirada iyo Taliyayaasha Ciidamadu] Beeshan Maxamuud Garaad u magacaabeen [kuma jiraan xilalkii la magacaabay ee aan hadda jirin]:

1. Wasiirka Wasaaradda Biyaha
2. Derejosiinta 28 Sarkaal oo ay ku jiraan laba [2] Janaraal
3. Komishanar, Guddiga Xuquuqal Insaanka
4. Guddiga Diiwaangelinta Ururada, Xubin
5. Guddoomiye Ku Xigeenka Gobolka Sanaag
6. Isuduwaha Wasaaradda Waxbarashada Gobolka Sool
7. Isuduwaha Wasaaradda Beeraha Gobolka Sool
8. Isuduwaha Wasaaradda Deegaanka iyo H. R. Miyaga Gobolka Sool
9. Isuduwaha Wasaaradda Madaxtooyada Gobolka Sool
10. Isuduwaha Wasaaradda Caafimaadka Gobolka Sool
11. Isuduwaha Wasaaradda Duulista Hawada Gobolka Sool
12. Isuduwaha wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Gobolka Sool
13. Isuduwaha Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta Gobolka Sool
14. Isuduwaha Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Gobolka Sool
15. Isuduwaha Wasaaradda Biyaha Gobolka Sool
16. Isuduwaha wasaaradda Macdanta Gobolka Sool
17. Isuduwaha Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guryeynta Gobolka Sool
18. Isuduwaha Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha Gobolka Sool
19. Isuduwaha Nabadaynta Gobolka Sool
20. Mareeyaha Samafalka Gobolka Sool
21. Gobolka Sanaag: 3 Isuduwe Gobol
22. **Magaacaabista Gobolka Xaysimo**
23. Gudoomiyaha Gobolka Xaysimo
24. Gudoomiye Ku xigeenka Gobolka Xaysimo
25. Xoghayaha Gobolka Xaysimo
26. Taliyaha Qaybta Booliska Gobolka Xaysimo
27. **Magacaabista Degmada Awrboogays**
28. Gudoomiyaha Degmada Awrboogays

29. Gud Ku Xigeenka degmada Awrboogays
30. Xoghayaha Degmada Awrboogays
31. **Magacaabista Degmada Xalin**
32. Gudoomiyaha Degmada Xalin
33. Gud Ku Xigeenka degmada Xalin
34. Xoghayaha Degmada Xalin
35. **Magacaabista Degmada Sarmaanyo**
36. Gudoomiyaha Degmada Sarmaanyo
37. Gud Ku Xigeenka degmada Sarmaanyo
38. Xoghayaha Degmada Sarmaanyo
39. **Magacaabista Degmada Carrooley**
40. Gudoomiyaha Degmada Carrooley
41. Gud Ku Xigeenka degmada Carrooley
42. Xoghayaha Degmada Carrooley
43. **Magacaabista Degmada God Aalo**
44. Gudoomiyaha Degmada God Aalo
45. Gud Ku Xigeenka degmada God Aalo
46. Xoghayaha Degmada God Aalo

GEBAGEBO:

Mudane Madaxweyne, mahad oo dhan Eebaa leh. Waxaan marlabaad kaaga mahad celinayaa waxqabadka la taaban karo ee aad ku meelmarisay heshiisyadii Awrboogays iyo Adhicadeeye, sidoo kalena waxaan u mahad celinayaa Wasiirka Madaxtooyada JSL, Maxamuud Xaashi Cabdi, oo isagu xil gaar ah iska saaray sida ummaddan ehelka ahi isu fahmi lahayd una wada shaqayn lahayd, iyo sidoo kale xubnaha xukuumaddaada, madax dhaqameedka iyo dadweynaha kal duwan ee siyaabaha kala duwan uga qayb qaatay hawshaas ballaadhan ee aad ku meelmarisey heshiisyadii degaankayga.

WA BILLAAHI TAWFIIQ

Xildhibaan Siciid Maxamed Cilmi [Siraadle]
Golaha Wakiilada JSL
Hargeysa

30. Xoghayaha Degmada Awrboogays
31. Magacaabista Degmada Xalin
32. Gudoomiyaha Degmada Xalin
33. Gud Ku Xigeenka degmada Xalin
34. Xoghayaha Degmada Xalin
35. Magacaabista Degmada Sarmaanyo
36. Gudoomiyaha Degmada Sarmaanyo
37. Gud Ku Xigeenka degmada Sarmaanyo
38. Xoghayaha Degmada Sarmaanyo
39. Magacaabista Degmada Carrooley
40. Gudoomiyaha Degmada Carrooley
41. Gud Ku Xigeenka degmada Carrooley
42. Xoghayaha Degmada Carrooley
43. Magacaabista Degmada God Aalo
44. Gudoomiyaha Degmada God Aalo
45. Gud Ku Xigeenka degmada God Aalo
46. Xoghayaha Degmada God Aalo

GEBAGEBO:

Mudane Madaxweyne, mahad oo dhan Eebaa leh. Waxaan marlabaad kaaga mahad celinayaa waxqabadka la taaban karo ee aad ku meelmarisay heshiisyadii Awrboogays iyo Adhicadeeye, sidoo kalena waxaan u mahad celinayaa Wasiirka Madaxtooyada JSL, Maxamuud Xaashi Cabdi, oo isagu xil gaar ah iska saaray sida ummaddan ehelka ahi isu fahmi lahayd una wada shaqayn lahayd, iyo sidoo kale xubnaha xukuumaddaada, madax dhaqameedka iyo dadweynaha kal duwan ee siyaabaha kala duwan uga qayb qaatay hawshaas ballaadhan ee aad ku meelmarisey heshiisyadii degaankayga.

WA BILLAAHI TAWFIIQ

Xildhibaan Siciid Maxamed Cilmi [Siraadle]
Golaha Wakiilada JSL
Hargeysa